Helsedirektoratet

# Turjumaanka dadka isticmaala adeegyada caafimaadka

— Xaq baad u leedahay inaad macluumaadka ku heshid luqaddaada

IS-1976

Tolk for deg som er pasient i helsetjenesten
Språk: Somali

Macluumaad sax ah iyo wadahadal ayaa muhiim u ah inaad hesho caawimo iyo daaweyn sax ah. Bukaan ahaan waa inaad hesho macluumaad ku habboon xaaladaada. Waa muhiim in aad shaqaalaha caafimaadka kala hadli kartid caafimaadkaaga, cudurkaaga iyo daaweyntaada.

Xeerka Turjumidda (ee soo baxay 2022) ayaa dhigaya in hay'adaha iyo adeegyada dawladdu ay isticmaalaan turjumaan aqoon leh marka ay lagama maarmaan tahay si aad u hesho daaweyn sax. Shaqaalaha caafimaadka sida kalkaalisooyinka, dhakhtarka, cilmi nafsi yaqaanka iwm. ayaa laga rabaa inay ilaaliyaan inaad bukaan ahaan hesho caawimaada aad u baahan tahay.

- Macluumaadka ku saabsan caafimaadkaaga iyo daawayntaada waa in laguugu sheego luuqad aad fahmaysid.
- Way adkaan kartaa in la fahmo ereyada iyo weedhaha cilmiga caafimaadka. Sidaa darteed, waxaad u baahan kartaa turjumaan inkastoo aad ku hadasho in yar oo af-noorwiiji ah
- Turjumaanku wuxuu joogi karaa isla qolka adiga iyo daweeyuhu *joogtaan, ama wuxu kaga soo qaybgali kara telefoon ama fiidiyow.

## Adeegga caafimaadka ayaa dalbanaya turjumaanka

- Adeegga caafimaadka waxaa waajib ku ah inuu hubiyo in aad u baahan tahay turjumaan iyo in kale. Sidoo kale waa inay iyagu dalbadaan turjumaanka.
- Turjumaanku waa u bilaash bukaanka/isticmaalayaasha adeegyada caafimaadka.
- Dhakhtarka ilkaha, markaad tahay qof weyn sida caadiga ah waa inaad iska bixiso turjumaanka iyo daaweynta ilkahaba.

## Kaliya turjumaanada aqoonta leh ayaa turjumaya

- Turjumaanka aqoonta leh wuxuu haystaa aqoon rasmi ah oo ku saabsan xirfadda turjumidda
- Carruurtu ma noqon karto turjumaan.
- Qoyska, asxaabta ama dad qofku yaqaano looma isticmaali karo turjumaan ahaan

## Sidee ayaad uga faa’idaysan kartaa wadahadal turjumaan la isticmaalayo?

- Adeegga caafimaadka u sheeg luqadda iyo lahjadda aad jeceshahay inaad ku hadashid
- U sheeg haddii aad si fiican u taqaanid luuqado badan
- U sheeg haddii aad qabtid baahiyo gaar ah, tusaale ahaan haddii maqalkaagu liito
- Si fiican isu diyaari wadahadalka. Weliba way wacan tahay inaad sii qoratid su’aalaha aad aad qabtid
- Su’aalaha oo dhan ku hagaaji shaqaalaha caafimaadka, ha weydiinin turjumaanka.
- Sheeg haddii aanad fahmayn turjumaanka
- Markaad hadlaysid isticmaal jumlado gaaban oo si cad u hadal. Markaas ayay turjumaanka u fududaanaysaa inuu si sax ah u turjumo hadalka
- Turjumaanku wuxuu turjumayaa  kaliya waxa la sheego. Turjumaanku kuma celin karo wixii hore loo sheegay
- Way wacan tahay inaad qoroto waxa la sheegay, si aad u xasuusatid
- Sheeg haddii maqalku ama muuqaalku xun yihiin marka turjumaanku ku jiro khadka telefoonka/fiidiyowga

## Waa maxay turjumaan, oo waa maxay waajibaadka turjumaanku?

- Turjumaanku waa inuu doorka turjumaanka ku sheego labada luqadoodba marka wadahadalka bilaabmayo.
- Turjumaanku dhinacna ma raacsanaha, waana dhexdhexaad. Taas oo macnaheedu yahay in aragtida iyo rayiga turjumaanku wax saamayn ah ku yeelan karin turjumidda.
- Turjumaanka waxa saaran waajib xog qarin, waana dembi inuu ku xadgudbo waajibka xog qarinta.  Taas oo macnaheedu yahay in aan turjumaanka loo oggolayn inuu qofna u sheego wixii lagu wadahadlay. Waa sidaas oo kale xataa marka turjumaanku shaqada ka tago
- Turjumaanku kuma siin karo talooyin ama kaama caawin karo inaad ka jawaabtid su’aalaha. Turjumaanku waa inuu turjumo oo keliya, oo hawlo kale uma qaban karo qofka bukaanka ah ama shaqaalaha caafimaadka.
- Turjumaanku wuxu ku waydiin karaa su’aalo ama kaa codsan karaa inaad si kale u sheegtid hadalka haddii ay jiraan wax turjumaanku aanu fahmin.

# Ma qabtaa cabasho ku saabsan inaan turjumaan la isticmaalin mar lagu siinayay adeeg caafimaad? Ma qabtaa su'aalo ku saabsan xuquuqdaada?

## Fadlan la xiriir:

U doodaha bukaanka iyo isticmaalayaasha
(Pasient- og brukerombudet) ee gobolka aad deggan tahay
www.pasientogbrukerombudet.no tel. 40 50 16 00

Sarkaalka Sinnaanta iyo ka hortagga Takoorka (Likestillings- og diskrimineringsombudet) tel. 23 15 73 00 LDO - Bogga hore

Ururka Ka Soo Horjeeda Takoorka Bulshada Dhexdeeda (OMOD)
kontakt@omod.no iyo www.omod.no

Hay'adda Kormeerka Caafimaadka ee gobolka aad deggan
tahay Hay'adda Kormeerka Caafimaadka waxay kormeertaa hay'adda daryeelka carruurta, adeegyada bulshada iyo caafimaadka | Hay'adda Kormeerka Caafimaadka Telka xafiiska dhexe: 21529900

## Ma qabtaa cabashooyin ku saabsan tayada iyo aqoonta turjumaanka?

Cabashooyinka waxaa lagu hagaajin karaa goobta caafimaadka ee aad bukaan ka tahay, ama Tolking i offentlig sektor | IMDi Integrerings- og mangfoldsdirektoratet (IMDi) oo ah hay'adda qaranka ee ka masuulka ah xirfadda turjumaannimada.

## Xeerarka xuquuqda bukaanka iyo waajibaadka shaqaalaha caafimaadka ee la xidhiidha isticmaalka turjumaan

Xeerka xuquuqda bukaanka iyo isticmaalayaasha
Xeerka xuquuqda bukaanka iyo isticmaalayaasha - Lovdata

Xeerka Shaqaalaha Caafimaadka
Xeerka Shaqaalaha Caafimaadka - Lovdata

## Xeerka turjumaadda

Xeerka masuuliyadda hay'adaha dawladda ee isticmaalka turjumaanka (Xeerka turjumaadda) - Lovdata

## Buugyarahani wuxuu jiraa isagoo ku qoran luuqado badan waxaana laga soo dejisan karaa:

**www.helsenorge.no iyo www.helsedirektoratet.no**